

	Kusoo dhawow xareynta elaktarooniga NLRB
	Waa maxay E-File?
	"E-File" waa habka lagu soo gudbiyo dukumeenti si elektaroonik ah oo khuseeya kiis mise baaritaan laga sugayo Guddiga Xiriirka Shaqada Qaranka (NLRB). Nidaamka E-File waa hab dagdag ah oo fudud oo dukumentiyada lagu xareeyo NLRB.
	Ma u baahanahay inaan xareeyo nuqullo badan oo dukumeentiyo ah oo aan si elektaroonig ah u xareeyo?
	Looma baahna in la xareeyo nuqullo badan oo dukumeentiyo ah oo aad si elektaroonig ah u xareeyso.
	Sidee ku helaa dukumeentiyadeydii hore ee elektarooniga loo xareeyay?
	Waxaad ka heli kartaa dukumeenti hore oo elektaroonig loo xareeyay iyada oo loo marayo My Account Portal (MAP) 90 maalmood laga bilaabo taariikhda elektaroonig xareynta.
	Waxaan ahay isticmaale hore oo E-File ah. Ma u baahanahay inaan buuxiyo Macluumaadka Xiriirka mar kasta?
	Maya. Istickmaalayaasha E-File ee hadda jira way "Gali Karaan" si ay u helaan macluumaadka xiriirkii hore loo galay iyagoo aan dib u galin.
	Xagee ka akhrin karaa sharciyada E-Filing?
	Shuruucda E-Filing halkan ayaa laga heli karaa. Shuruudaha E-Filing sidoo kale waa lagu soo bandhigaa mar kasta oo aad gasho nidaamka E-Filing.
	Dukumeentiyo noocce ah ayaan elektaroonig ahaan u xareyn karaa?
	Dukumeentiyada badankood waxaa lagu xareyn karaa NLRB iyadoo la adeegsanayo nidaamka E-Filing, oo ay ku jiraan eedeymaha iyo Codsiyada. Shuruudaha iyo xeerarka oo dhan waxay diyaar kuyihiin (guji halkan).
	Kiisaska aadka u adag, ma u baahanahay in aan E-Fayl gareeyo dukumeentigeyga si gaar ah ee hoos timaada kiis lambar kasta?
	Maya, dukumeentiga waa in kaliya lagu E-File gareeyaa hogaanka kiis lambarka hoostiisa (side., ugu hooseeya).
	Kaalmo farsamo ma la heli karaa saacadaha shaqada kadib?
	Shaqaalaha wakaaladda lama heli kadib markay xirmaan saacadaha shaqada ee caadiga ah si ay u

	<p>caawiyaan dhinacyada E-File-ka. Haddii ay kugu adkaato saacado kadib, waxaad isku dayi kartaa inaad isticmaasho kumbuyuutar ka duwan. Si kumeelgaar ah meesha looga saaro aaladda xannibta fariimaha shaashada kasoo booda oo badala filterkaaga spamka si loogu oggolaado helitaanka fariimaha nlr.gov waxaa surtagal ah inay dadajiso helitaanka ogeysiis ah in E-Filing-kaaga la helay. Fashilka farsamo ee ku imaada nidaamka E-Filing ee Wakaalada ayaa suurtagal ah inay cudur daar ka bixiso soo dajinta soo daahday, laakiin dhibaatooyinka isticmaalaha caadiga ah ma sameyn doono. Haddii dhibaatooyinka isticmaalaha caadiga ah aan la sixi karin ka hor 11:59 p.m. Xilliga kama dambaysta ah ee gudbinta E-Filing, soo gudbinta soo daahday ma noqon doonto cudurdaar. Tusaalayaasha dhibaatooyinka isticmaalaha caadiga ah waxaa kamid ah dhibaata khadadka telefoonka, bixiyaha adeegga internet-ka ee isticmaalaha, qalabka hardware-ka, software-ka, isticmaalayaasha oo ku fashilma inay fahmaan mise raacaan tilmaamaha E-Filing, mise diidmada gudbinta sabab ah dukumeentiga oo fayras leh awgeed.</p>
	<p>Waa goorma xilliiga kamadambeysta ee E-filling? Ma codsan karaa in la ii kordhiyo?</p>
	<p>Dukumeentiyada la E-File-gareeyay waa in lagu xereeyaa shabakada Wakaalada kahor saqda dhexe ee aagga waqtiga xafiiska helaya. Codsiyada kordhinta waqtiga waxaa la sameeyaa iyadoo la buuxinayo foom onleen ah. Waxaad codsan kartaa in lagu kordhiyo waqtiga NLRB ee Habraaca E-Filing-ka adigoo gujinaya halkan. Fadlan la soco in soo gudbinta lagu guuleysto ee codsiga waqti kordhinta ee Wakaaladda ee habraaca E-Filing-ka aysan macnaheedu ahayn in codsigaaga la aqbalay. Xafiiska helaya codsiga ayaa si toos ah kuula soo xiriiri doona si uu u xaqiijiyo in la aqbalay mise la diiday.</p>
	<p>Kawaran haddii aan weydiin ka qabo liiskan?</p>
	<p>Weydiimaha aan halkan lagu xusin waxaad u soo diri kartaa webteam@nlrb.gov.</p>
	<p>Kawaran haddii aan helo in kabadan hal Akoon Lambar?</p>
	<p>Haddii aad hesho in kabadan hal Akoon Lambar, waa in aad ku darto kuwa boggaaga onleenka</p>

	<p>sidoo kale. Boggaaga, gali akoon lambarka dheeriga ah ee sanduuqa “Add Accounts and Adress” kadibna dooro batoonka Add. Bogga wuxuu ku cusboonaysiin doonaa macluumaadka akoonka dheeraadka ah.</p>
	<p>Waa maxay E-Service?</p>
	<p>"E-Service" waa adeegga elektarooniga ee Guddiga iyo ALJ go'aamada iyo amarada dhinacyada. Dhinacyada iska diwaangaliya E-Service waxay heli doonaan, isla marka lagu dhajiyo E-Docket Guddiga maalinlaha ah boggooda, iimayl ka kooban ogeysiis rasmi ah oo kusaabsan go'aanka Guddiga mise Garsooraha iyo xiriirka elektarooniga ah ee go'aanka. Ogeysiisyada E-Service waxa la soo diri doona dhammaadka maalinta ganacsiga ee xarunta NLRB ee Washington, D.C. (5:00 p.m. Waqtiga Bari). Go'aamada guddiga iyo ALJ looma diri doono dhinacyada iska diiwaangaliyay E-Service.</p> <p>Marka dukumeentiyada si elektaroonig ah kiis lagu xareeyo, NLRB waxay u soo dirtaa ogeysiis iimayl ixtiraam leh dhinacyada kale ee kiiska iska diiwaangaliyay inay helaan adeegga elektarooniga ah ee Guddiga iyo go'aamada ALJ. Iimaylka wuxuu bixiyaa isku xirka dukumeentiyada sida ogeysiin ixtiraam leh kaliya; kama dhigna adeegga dukumeentiga kooxda xereyneysa iyadoo la raacayo Xeerarka Guddiga & Xeerarka 102.114(a) mise 102.114(i). Ku darso oo, iimaylkani waxa uu tilmaamayaa oo kaliya in dukumeentigu ay Hay'ad E-File gareysay. Ma noqonayso go'aan ka gaaridda ah in dukumeentiga ay aqbashay Wakaaladda si uu u akhriyo shuruudaha xaraynta. Haddii ay dhacdo in dukumeenti la E-File gareeyay loo baahdo in loo gudbiyo qolo kale dacwadda, dhinaca kale waa in lagu soo diraa iimayl, haddii ay suurtagal tahay. Haddii dhinaca kale aysan awoodin inay helaan adeegga elektarooniga ah, waa in kooxdaas lagu ogeysiiyaa telefoonka nuxurka dukumeentiga la gudbiyay iyo nuqul kamid ah dukumeentigu waa inuu ugu adeegaa si</p>

	<p>shakhsi ah ugu dambayn maalinta xigta, keenista habeenkii. adeegga, mise, iyadoo ogolaanshaha kooxda helaysa dukumeentiga, iyadoo loogu gudbinayo nuqul ahaan. Eeg Farqadda. 102.114(a) iyo (i) ee Xeerarka iyo Sharciyada Guddiga.</p> <p>Haddii aadan ka diiwaangashaneyn E-Service, oo aad rabto inaad sidaas sameyso, waa inaad gasho NLRB My Account Portal oo aad doorato sanduuqa hubinta leh “Waxaan oggolahay inaan aqbalo adeegga rasmiga ah ee dukumeentiyada si elektaroonik ah ee NLRB.”. Eeg qeybta FAQ “Sideen ku soo galaa NLRB My Account Portal?” wixii macluumaad ah ee kusaabsan galitaanka My Account.</p>
	<p>Waa maxay login.gov?</p>
	<p>login.gov waa adeeg bixiya marin u gaar ah oo online ah barnaamijyada iyo shabakadda dowladda. Heysashada akoon login.gov, waxa aad gali kartaa shabakado badan oo dowladeed, oo ay ku jiraan shabakadda dadweynaha NLRB, oo wadata ciwaanka iimayl iyo furaha sirta ee isku midka ah.</p>
	<p>Maxay NLRP u isticmaalaysaa login.gov?</p>
	<p>login.gov waxay isticmaashaa xaqiijinta laba-geesoodka ah, iyo fure sir oo adag, oo buuxiya Shuruudaha Machadka Qaranka ee Heerarka Tignoolajiyada ee jiritaanka sugan iyo xaqiijinta. Isticmaalka login.gov, waxaad heli doontaa darbi dheeraad oo ammaan ah si ay kaaga caawiso ilaalinta boggaaga My Account si looga hortago xadgudubyada qallafsan.</p>
	<p>Sidee u galaa Bogga NLRP My Account?</p>
	<p>Si aad u gasho Booga NLRP My Account waa inaad leedahay akoon login.gov. Haddii aanad hore u lahayn akoon login.gov, waa inaad mid samaysataa. Tani waa tallaabo hal-mar ah. Si aad u heshid caawin samaynta akoon cusub oo ah login.gov guji halkan wixii macluumaad dheeraad ah.</p> <p>Kadib markaad bixiso aqoonsiga login.gov waxaa lagu weydiin doonaa inaad galiso Lambarka Xisaabta iyo ciwaanka iimaylka ee la xiriira Akoonka. Macluumaadkan waxaa laga heli karaa ogeysiiska iimaylka aad</p>

	<p>heshay kadib markii aad soo gudbisay dacwad/codsi mise waqtiga aad galisay dukumeentiyada taageeraya dacwadaada/codsiigaaga.</p> <p>Waxaad u baahan doontaa inaad isticmaasho ciwaankaaga iimaylka login.gov, furaha sirta iyo lambarka amniga ee halka mar ah mar kasta oo aad rabto inaad gasho Bogga My Account.</p>
	<p>Kawaran haddii aan hore u lahaa akoon login.gov?</p>
	<p>Haddii aad hore u lahayd akoon login.gov, uma baahnid inaad mid labaad samaysato. Isticmaal ciwaankaaga login.gov ee jira iyo furaha sirta, iyo lambarka amniga ee halka mar ah si aad u gasho Bogga NLRP My Account.</p>
	<p>Ma la wadaagi karaa akoon login.gov qof kale?</p>
	<p>Maya. Qof kasta wuxuu u baahan yahay akoonkiisa login.gov. Qof kasta waa inuu samaystaa akoonkiisa login.gov, oo wata ciwaankiisa iimaylka u gaarka ah (ma aha iimayl aad qof kale la wadaagto).</p>
	<p>Ciwaankee iimayl ayaan isticmaalaa si aan u sameysto akoon login.gov?</p>
	<p>Waxaad isticmaali kartaa ciwaan kasta oo iimayl ah si aad u sameysato akoonkaaga login.gov. Haseyeeshee, waxaan kugula talineynaa inaad isticmaasho ciwaanka iimaylka aad qorsheyneyso inaad isticmaasho ee aad u dhigeysa NLRB.</p>